

IIB MA GAO

FAAFINTA

الجريدة



RASMIGA AH

الرسالة

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديموقراطية

Sannadka 7aad

Muqdisho 15 Oktoobar 1979 L. 1R 10

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

FAAFINTA BIL SOO BAXA

جريدة شهورية

QIIMUHU: waa 5 Shilin lambar waliba **RUKUNKA:** Sanadkii waa Sh. 100
 Soomaaliya guduheeda — dibadeedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto
 waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qoritaanku F. R.
 halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh — Rukunka iyo qoritaanku waxaa
 la weeydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu
 bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lagagta

KOOBNIIIN

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 35 ee 3 Okt. 79, Sharci ku saabsan dheeरeyn muddo
 Cafis huuxa oo loo fiday Dadka ka baxsaday Dalka Soomaali-
 yeed.

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNNAHA J.D.S. L. 47 ee 15 7 79,
 Habka Hirgelinta Heshiisyada Aqoonsiga Qa-
 xootinnimada.

XEER MADAXWEYNNAHA J.D.S. L. 48 ee 23 8 79,
 Kirada Cucub ee Baabuurta Xamuulka qaada

XEER MADAXWEYNNAHA J.D.S. L. 49 ee 22.9.79,
 Soo saarid lacag dahab ah, Qalin ah, iya maar
 (cupronickel) oo loogu tala galay xuska san-
 nad guuradii 10aad ee Kacaanka 12 Okt. 1969.

Wakaaladda Madbacadda Qaranka — Muqdisho.

**QAYBTA LABAAD
X E E R**

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 47 ee 15 Luulyo 79, Habka Hirgelinta Heshiisyada Aqoonsiga Qaxootinnimada

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAAQ ARKAY: Heshiiska 1951 iyo Borootokoolka 1967 ee ku saabsan Aqoonsiga Qaxootinnimada.

ISAGOO AQOONSAN: Inay tahay lagama maarmaan in la soo saaro habka sharchiyeed iyo maamuleed ee lagu xaqiijinayo. Qaxootinnimada Dalka Soomaaliyeed,

ISAGOO TIXGEI-INAYA: Talada Wasiirka Dawladaha Hoos iyo Horumarinta Reer miyiga,

WUXUU SOO SAARAYAA

Qodobka 1aad

SHURUUDAH AQOONSIGA QAXOOTINNIMADA

1. Aqoonsiga Qaxootinnimad waxaa la siin karaa Dadka arji soo qorta lehna shuruudaha ku qoran qodobka 1aad ee Heshiiska 1951, Brotokoolka 1967 iyo Heshiiska Ururka Midcwgga Afrika 1969 kuna saabsan Aqoonsiga Qaxootinnimada.
2. Habka Hoos ku qoran m asaameynaayo Qaxootiga faraha badan ee ay Dawladdu ku aqoonsato xaaladda gaarka ah.

Qodobka 2aad

GUDDIGA OGOLAANSHAH A QAXOOTINNIMADA

1. Waxaa la dhiisayaa Guddi gaar ah oo leh awoddha siinta Qaxootinnimada, Guddigu wuxuu ka kooban yahay:-
 - i) Garsoore uu magacaabo Guddoomiyaha Maxkamadda Sare Guddoomiyeye,
 - ii) Qof ka wakiil ah Xafiiska Garyaqanka Guud ee Dawladda Xubin
 - iii) Sarkaalka Qaxootiga ee Qaranka Xubin
 - iv) Qof wakiil ka ah Wasradda Caafimaadka Xubin
 - v) Qof wakiil ka ah Wasaaradda Arrimaha Dibadda Xubin
 - vi) Qof ka wakiil ah Ciidanka Nabadsugedda Xubin

2. Wakiilka Laanta Qaxootiga ee Ummadaha Midoobay ee jooga Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya goob joog ahaan ayuu fadhiyada ka qeyb geli karaa.
3. Guddiga waxaa wajib ku ah inuu araajida Qaxootiga uga Go'aan gaaro sidii ay la noqoto, isagoo raacaaya Qoddobada Heshiiska 1951 ee ku lug leh arrintaas, wuxuu kaloo go'aar ka gaarayaa lumida Aqoonsiga Qaxootinnimada.
4. Guddigu wuxuu sameynayaa habka u ku shaqeeyo.

Qodobka 3aad

RAFCAAN

1. Qof kasta oo ka cabanaya Go'aanka Guddiga wuxuu Rafcaan u qaadan karaa Guddiga Caddaaladda ee ka dhisan Madaxtooyada. Guddiga Caddaaladda wuxuu go'aan ka gaarayaa Rafcaannada ay u soo qaateen Dadka ka cabanaya Qodobada 31,32 iyo 33 Heshiiska 1951.
2. Guddiga Caddaaladda wuxuu awood u leeyahay inuu aqbalo, beddelo ama tirtiro Go'aanka Guddiga, Go,aankiisana waa mid kama dambeys ah.

Qodobka 4aad

DOKUMENEI

Marka qof loo aqoonsado Qaxooti, wuxuu xaq u leeyahay in la siiyo dokumentiga lagu tilmaamay sharciga Qaranka amá kan Dawliga.

Qodobka 5aad

Xeerkan wuxuu u dhaqan gelayaa si deg deg ah waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho 15 Luulyo 1979

Wasiisrka Dawladaha Hoose & Horumarinta Miyiga
S/Gaas Jaamac Maxamed Qaalib

Madaxweynaha J.D.S.
S/Gaas Maxamed Siyaad Barre